

Fahmida Dhageysiga Dacwadaha Maxkamadaha

Xeerka 5 (Rule 5) / Dacwo-ooqid / Marka ugu Horeeysa Maxkamad Hor keenida: Eedayanaha waxaa loo sheegaa dambiyada lagu soo eedaynayo. Xaakimka ayaa xukuma damaanada iyo sharuudaha siideynta. Hadii eedayanahu uusan awoodin inuu qareen qabsado, qareen lacag la'aan ah ayaa loo magacaabi inuu difaaco. Eedayanaha waxaa dhici karta in lagu sii daayo wajigiisa iyadoon wax damaanad ah aan la waydiin.

Xeerka 8 (Rule 8): Waxa uu siiyaa eedayanaha waqti uu ku qabsado qareen ka dib kolka marka ugu horeeysa maxkamada la hor keeno. Tani waxaa lagu dari karaa Xeerka 5 (Rule 5) hadii uu eedayanahu jaa qareen leeyahay ama qareen lacag la'aan ah loo magacaabay.

Dhageysiga Dacwada (Omnibus) Daw-raacida: Waa fursad uu eedayanahu ku codsan karo in qaar ka mid ah daliilaha ka dhanka ah aan la isticmaalin xilliga maxkamada. Eedayanahu waxa uu ka codsan karaa maxkamada inay go'aamiso in xaquuqiisa lagu xadgudbay xilligii baaritaanka dambiga.

Dhageysiga Dacwada Dambi qirashada / Ka wada xaajoodka Dambi Qirashada: Eedayanahu waa uu qiran karaa dambiga lagu soo eedeeyey markii uu rabo wixii ka dambeeya marka hore ee maxkamadda la hor keeno. Heshiiska dambi qirashadu waa heshiis ay wada gaaraan eedanaysanaha iyo xeer ilaaliyaha kaa oo uu eedanaysanhu uu ogolaado inuu dambiga qirto iyadoo qirashada ay weheliyaan sharuudo cayiman. Heshiiska dambi qirashada macnahiisu waa in arrinta waan-waan lagu dhameeyo maxkamad la'aan.

Dhageysiga Dacwada Maxkamada Weyn ka Hor: Badanaa tani waa fursad loo isticmaalo in lagu xaliyo dacwada maxkamadda qaadideeda ka hor. Xeer-ilaaliyahu iyo qareenka eedayanahu waxa ay soo af-garaan arrimaha mudacu ka jiro si loogu diyaar garoobo maxkamad qaadida. Makhraatiyaasha waxaa dhici karta in lagu amro inay maxkamada hor yimaadaan.

Qaadida Maxkamada: Eedayanaha waxa uu kala dooran karaa in dacwadiisa uu qaado xaakim kaliya ama inay qaadaan garsoore dadweyne. Hadii dambiga lagu waayo eedayanaha waa la sii deyn. Hadii laakiin dambiga lagu helo eedayanaha, kiisku waxa uu u sii gudbi wajiga ciqaabta.

Xukumida/Ciqaabta: Eedayanaha waxaa xukunka lagu ridi ka dib kolka dambi uu qirto ama lagu helo. Xukunka lagu ridayo eedayanaha waa khasab inuu waafaqsanaado Sharcia gobolka.

Dhibaataynta

U adkaysiga dhibaataynta

Qofna kuma uu tashado inuu noqon dhibane dambi laga galay. Inta badan dhibanayaasha waxaa ku dhaca fajac kolka dambi laga gal. Xasuusnow:

- ✓ Ma jiro jid sax ah ama khalad ah oo la dareema.
- ✓ Dareenka aad dareemaysaa waa mid cid walba ay dareento oo caadi ah, in kastoo ay u muuqdaan inay yihiin waxa aan caadi ahayn.
- ✓ Waxaa dhici karta inuu kugu dhaco yaab iyo amakaag ah waxa dhacay.
- ✓ Murugo, tiiraanyoo iyo walwal ayaa inta badan weheliya geerida ama waxyeelida ehelka.
- ✓ Xaquuqdu inta qaalibka waa wax la arko.

Nalaga soo xiriir:

**Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Degmada Anoka
(Anoka County Attorney's Office)**

763-324-5550

attorney@co.anoka.mn.us

anokacounty.us/attorney

Adeegyada Dhibanaha/Makhraatiga

763-324-5540

Saacadaha 8 da subaxnimo ilaa 4:30

galabnimo, Isniin ilaa Jimce

victimwitness@co.anoka.mn.us

anokacounty.us/victimwitness

Jawaab-celin

Waxa aad doonaynaa inaad noo sheegto waxa aad nagala kulanto anaga. Si aad u bixiso afti ra'yigaagga ku saabsan, booqo shabakada anokacounty.us/vwfeedback.

ADEEGYADA DHIBANAYAASHA DAMBIYADA LAGA GALO

Xaquuqdaadda iyo Nidaamka Calaaladda Dambiyada



Qaybta Adeegyada Dhibanaha/ Makhraatiga

Fariin kaaga imaanaysa xeer-Ilaaliyaha


Degmadda Anoka Tony Palumbo

Xafiiskayaga waxa uu kuu aqoonsaday inaad tahay dhibane dambi laga galay. Waa hadafkayaga inaan kaa siino faham nidaamka cadaaladda, aan kuu soo gudbino akhbaar sugan oo ku saabsan kiiskaaga dacwada aana kuu sharaxno xaquuqdaadda dhibane sida uu qabo sharciga Minnesota.

Qaybta Adeegyada Dhibanayaasha/ Makhraatiyada ee Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Degmadda Anoka waxaa loo abuuray inuu hogaan kuu noqdo inta maxkamadeyntu socoto.

Dhibanayaashu waxa ay ka ciyaaraan door lama huraan ah nidaamka cadaaladda la shaqeyntaada nidaamka cadaaladduna waxa ay lagama maarmaan u tahay la xisaabtanka dambiilaha. Waa aanu og nahay in ahaanta dhibane dambi laga galay ay noqon karto wax weyn oo dadka waxyeelo weyn u gaysta. Sababtaa weeye waxa aan u doonayno inaan kaa caawino inaan kaala shaqeyno sidii aad u qaabili lahayd nidaamka cadaaladda.

Mahadsanid,



Tony Palumbo

Xeer-Ilaaliyaha Degmadda Anoka
(Anoka County Attorney)

Qasdiga Adeegyadda Dhibanaha/Makhraatiga ee Degmadda Anoka waa inuu ilaaliyo xaquuqda iyo maslaxada dhibanayaasha dambiyada laga galo iyo makhraatiyaasha nidaamka cadaaladda, iyadoo lagu dhiiri-gelinayo ka qayb qaadad habraaca maxkamadda waxna laga qabanayo wixii baahi gaar ah ee ay qabaan ee ay keentay dhibaataayntu.

Xaquuqda Dhibanaha & Baahida

Xaquuqda Dhibanaha

Qodobka sharciga ah ee Minnesota ee 611A (Minnesota Statute 611A) waxaa uu siiyaa xaquuqahan soo socda dhibanayaasha dambiyada laga galo:

- Xaquuqda Ogaysiinta
- Xaquuqda ka qaybqaadadka maxkamadeynta
- Xaquuqda ka dhowrida waxyeelo
- Xaquuqda codsiga gargaar dhaqaale

Oraahaha hadalka Dhibanaha

Dhibanayaashu waxa ay xaq u leeyihiin inay hadli karaan ayna siin karaan xaakimka akhbaar ku saabsan waxyaaladda uu u geystay dambiilahu. Tan waxaa loogu yeeraa Oraahda

Oraahda hadalka Dhibanaha waxa ay siisaa dhibanaha iyo qoyskiisaba fursad ay maxkamada gudaheeda uga muujin karaan, dhibka, xanuunka iyo burburka dhaqaale ee dambiga laga galay u geystay. Oraahda hadalka dhibanaha waxa ay siin kartaa xaakimka akhbaar uu isticmaali karo kolka uu go'aansanayo ciqaabtu waxa ay noqon doonto, waxay kaloo la socod-siin kartaa dambiilaha waxyaalada uu u geystay dhibanaha.

Gargaarida Dhibanayaasha

Dambiyada laga Galo

U Qaybsanaha Arrimaha Dhibanaha/ Makhraatiga Waxa uu bixin karaa:

- Gargaar ku saabsan Fahmida xaquuqda Dhibanayaasha dambiyada laga galo iyo nidaamka cadaaladda
- Xiriirin hay'adaha ilaalinta sharciyada, xeer-ilaaliyeyaasha iyo kuwa xabsiyada
- Ogaysiinta Qaadida dacwooyinka iyo la soo socodsiiin wixii soo cusboonaada
- Ku dhiiri-gelin ka qayb-qaadadka habka maxkamadeynta
- ka qaybgalka qaadida dacwada
- U diyaar garowga mukhraati ka furida maxkamada
- Gargaarid dhaqaale oo leh qaan, magdhowyada, degdeg dhaqaale u siin, iyo siin lacagaha la siiyo dhibanayaasha fara-xumeynta xoogida ah loo geysto
- Akhbaar ku saabsan cadaalad soo dabaalida iyo wada hadalka dhibanaha - dambiilaha
- U gudbinta adeegyo quman

Amarada Ilaalinta ah:

Amaradda Amaan Siinta ah (No Contact Orders) iyo Kuwa Tacadida Qoyska ka dhaca awgii loo bixiyo ee iyada Amaan Siinta ah (Domestic Abuse No Contact Orders) waa amarro dambi ah oo maxkamadeed oo uu soo saaro xaakim waxayna jiri karaan mudadda maxkamadeynta oo dhan ama waxa ay noqon karaan sharuud ka mid ah borobooshinka eedaynaha la galiyo.

Amaradda Ilaalinta ah [Orders For Protection (OFP)] iyo Amaradda Khashkhashaad Reebida [Harassment Restraining Orders (HRO)] waa amarro madani ah oo uu dalbado shakhsi doonaya inuu helo amaan ama laga daayo khashkhashaad. Ma jiraan wax khidmad oo la bixiyo kolka la dalbanayo amarka la yiraa (OFP) ga hadii tacadi geystahu uu yahay qofka xubin ka ah qoyska ama ay isqabaan qofka dhibka ka sheegaynaya.